

## 2.1 Xalalka ay heli karaan kuwa dugsiga ka baxay?

**Waa maxay mustaqbilka dhalinta korani?**

Futures For Young Adults Program (FFYA) (Barnaamijka Mustaqbilka dhalinyarada koran) wuxuu (*marmar waxaa loogu yeeraa Xalalka bulshada*) siiyaa kaalmo ardada iinta leh si ay u sameeyaan xalalka dugsiga iyo dugsiga ka dib. Hawsha FFYA waxaa ka mid noqon kara khibrada shaqo, waxbarasho intaas dhaafsiisan, meelaynta maalinta iyo xalalka ka qaybgalka arrimaha bulshada. Waxaad heli kartaa barnaamijka loo yaqaan Futures For Young Adults Program haddii aad jirto 18 sanadood markaad dugsiga dhamayso aadna helayso kaalmo la soo mariyo Barnaamijka Ardada linta leh (ama wax u dhigma). Macluumaad intaas ka badan la xiriir Kooxda **Intake and Response** ee Wasaarada Adeega Adamiga 1800 783 783.

**Maxaa Centrelink bixisaa?**

Waxaa jira xalal kala duwan, kuwa yar oo hoos ku qoran ayaa ka mi d ah:

**Disability Support Pension** – waxaa laga yabaa inay heli karaan dadka jira 16 haddii iintaadu kaa celiso shaqaynta.

**Pensioner Education Supplement** – haddii aad ka qaadato lacag Centrelink waxaad heli kartaa lacag siyaada ah oo ah lacagta waxbarashada haddii koorsada la ansixiyey.

**Mobility Allowance** – haddii aadan isticmaalin gaadiid dadweyne aadna u baahan tahay caawimo aad ku hesho shaqo, waxbarasho, shaqo tabaruc ah ama meelayn maalmeed waxaa laga yaabaa inaad qaadato lacag labadii asbuuc hal mar ah.

**Rent Assistance** – haddii aad ku jirto guri aan dawladu kabin (sida siinta lacag qof) waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelato caawimada ijaarka.

**Macluumaad intaas ka badan oo ay ku jiraan shuruuda mudnaanta la xiriir Centrelink tel: 132 717.**

**Waa maxay shaqada la kaalmeeyey?**

Fursadaha shaqada la kaalmeeyey waxaa heli kara dadka u baahan caawima yar oo siyaada ah meel lagu shaqaynayo.

Waxaa jira dhowr adeegbixiye. Si aad u hesho kan kuugu dhow la hadal Adeega Macmiilaha Centrelink tel: 13 27 17. Liistada ayaa iyadana laga heli karaa websaytyada soo socda:

**ACE National Network**

[www.acenational.org.au](http://www.acenational.org.au)

**Wasaarada Qoyska, Gurisiinta, Adeegyada Bulshada iyo Arrimaha Dadka Asaliga ah**

[www.FaHCSIA.gov.au](http://www.FaHCSIA.gov.au)

**Waa maxay xalalka waxbarasho oo intaas ka badni?**

Wasaarada waxbarashada, shaqada iyo xiriirka shaqaalaha waxaa bixisaa **Saraakiisha Xiriirka linta Qaranka** kuwaas oo awoodi doona inay kaala hadlaan dhamaan xalalka TAFE, Jaamacada ama fursadaha shaqada agagaarkaaga. La xiriir RMIT tel: 9925 3531 si aad u hesho faahfaahin dheeraada.

Haddii VCE aanay ahayn xal weydii dugsigaaga wixii la xiriira **Victorian Certificate of Applied Learning (VCAL)** kaas oo ah xal aad heli karto.

Waxaa jira korsooyin horumarineed oo TAFE waxayna leeyihiin badankood saraakiisha iinta ee TAFE. Si aad u hesho TAFE ka kuugu dhow booqo [www.tafe.vic.gov.au](http://www.tafe.vic.gov.au) ama wac Wasaarada Waxbarashada iyo Horumarinta Ilmanimada Hore tel: 1800 809 834.

Liistada Ururada Waxbarashada waxaa laga heli karaa [www.acfe.vic.gov.au](http://www.acfe.vic.gov.au)

Guryaha Neighbourhood houses iyo xarumaha bulshada waxay bixiyaaan koorsooyin kala duwan iyo xalal madadaalo. Si aad u hesho meesha kuugu dhow gal [www.anhlc.asn.au](http://www.anhlc.asn.au) ama wac 9654 1104.

<http://www.cmag.org.au>